



Su'aalaha Badanaa Laiska Weydiiyo Maskiga *(Waxaa la cusbooneysiisay 04-03-2023)*

Wixii loo gaaro Abriil 3, 2023, Maamulka Caafimaadka ee Oregon malahan sharuudo maaski xirasho oo loo doonayo wax goobo ah kuwii ay ahaadaanba.

Hoos waxaa ah suaalaha badanaa la iska weydiiyo (FAQ) Sharuucda Maamulka ee Oregon (OAR) ee la xiriira xirashada maaskiga si la isaga difaaco faafitaanka COVID-19 iyo fayrasyada kale ee habdhiska neefmareenka waxaana kujira talooyin guud oo kusaabsan xirashada maaskiga. OAR [333-019-1011](#), Sharuudaha Xirashada Maaskiga ee Xakamaynta COVID-19 gudaha Goobaha Caafimaadka; OAR [333-019-1015](#), Maaski Kuxirashada Iskoolada iyo OAR [333-019-1025](#), Sharuudahooda Maaski Xirashada ee loogu tala galay Goobaha Gudahooda haatan waa laga noqday dhaqan galna maahan wixii haatan kadambeeya. Booqo OHA [bogeeda websaytka ah ee badbaadada](#) si aad u hesho xog intaan ka badan aadna u aragto amarada looga noqonaayo sharuucda. Su'aalahaan Badanaa La Isweydiiyo (FAQ) ayaa waxaa laga yaabaa in si isdabajooga ah loo cusbooneysiyo.

S: Shardiga maaski ku xirashada goobaha daryeelka caafimaadka miyaa la qaaday Abriil 3, 2023?

Haa, shardiga ku xirashada maaskiyada goobaha caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon waxaa la qaaday Abriil 3. Goobaha daryeelka caafimaadka ayaa wali maamuladoodu ka dalbi karaan shardiga xirashada maaskiyada bixiyeyaasha, shaqaalaha, bukaanada, iyo dadka goobahaasi imaanaya. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ayaa looga baahan karaa inay xirtaan maaskiyo ayadoo taasi ay tahay u hoggaansamida sharuucda federaaliga ah. Bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ayaa ay tahay inay isla eegaan dadkay u shaqeeyaan si loo fahmo wixii sharuudo ah ee khuseeya arrinka ee loogu tala galay xirashada maaski.

S: Shuruudaha maaskiga ee goobaha daryeelka caafimaadka waa maxay sababta OHA uu u qaaday? Miyuu OHA tixgaliyay walaacyada dadka halista intii hore ka sarreysa ugu jira cudurka daran ee COVID-19?

Go'aanka meesha looga saarayo shardiga maaski xirashada ee gobolka ee shaqaalaha, bukaanka iyo dadka goobaha caafimaadka soo booqanaya, wixii loo gaaro Abriil 3, waxaa loola gaaray si wada jir ah khubaro ku takhasustay mawduucaas waxaana lagu saleeyay xaddiga isu gudbinta haatan gobolka ka jirta ee

cudurka, oo aad u hooseeya ilaa ay saamaxayso taasi maaskiyada inaan wax intaan ka badan loo baahnayn in lagu dhex xirto goobaha caafimaadka. Waxaanu aaminsan nahay goobaheena caafimaadku inay raacaan ka hortagga isu gudbinta dullinka oo habboon iyo talo xakamayn ayna ku jaan gooyaan sharuudaha maaski xirashada ee gobolka iyo federaalka markii ay arrinka khuseeyaan.

Xirashadu maaski wali waxay sii ahaanaysaa hab wax ku ool ah oo lagu dhimo isu gudbinta fayrasyada habdhiska neefsashada asiiba. OHA wuxuu ku boorinayaa shakhsiyaadku inay xirtaan maaski goob kastoo ay joogaan, ayadoo ay kujiraan goobaha caafimaadka haddii ay xanuunsan yihiin, haddii ay halis badan ugu jiraan xanuun daran (ama ay la nool yihiin qof halis sare kujira), ama haddii waqti un kii uu ahaadaba xirashada maaski ay ka dhigto kuwo dareema istareexid intii hore ka badan.

S: Muxuu OHA uga qaaday waajibinta maaskiga dugsiyada ama iskoolada iyo goobaha dadwaynaha ee gudaha dhismayaasha ah?

Maarso 12, 2022, OHA ayaa qaaday waajibinta maaskiga ee goobaha dadwaynaha ee gudaha dhismayaasha iyo gudaha dugsiyada. Dadku waxay sii wadan karaan xirashada maaskaro markay joogaan goobaha dadweynaha iyo goobaha shaqada. Saraakiisha caafimaadku waxay sidoo kale si xoogan ugu talinayaan in dadka halista sare ugu jira xanuunka daran, ama ah daryeelbixiyeyaasha qof halis sare ugu jira xanuun daran ama lanoolba qofkaas ay sii wadaan xirashada maaskiyo markay joogaan goobaha dadweynaha, gaar ahaan markay ku sugan yihiin xaafadaha uu ka jiro faafitaan heerkiisu sarreeyo.

S: Markuu go'aanka qaadista waajibinta maaskiga uu qaadanayay, OHA miyuu kaliya guud ahaan eegay kiisaska iyo dadka isbitaalada la dhigayo mise OHA waxuu tixgaliyay culayska COVID-19 iyo natiijooyinka caafimaad ee aan loo sinnayn marka la eego bulshooyinka nugul iyo bulshooyinka aan caddaanka ahayn?

OHA waxaa uu xisaabta ku darsaday dhawr arrimood markii uu qaadanayay go'aanka qaadista waajibinta maaskiga ee gudaha goobaha caafimaadka. Sida uu dhigayo xeerka maamulka ee 333-019-1011, kaasi oo dhigaya in lagu xirto maaskiyo goobaha caafimaadka dhexdooda, Sarkaalka Caafimaadka Gobolka Oregon iyo Agaasimaha Caafimaadka Dadwaynaha waxaa waajib ah inay xisaabta ku darsadaan, kuna darsadeen ugu yaraan macluumaadka soo socda:

- Heerarka gudbinta ee COVID-19, sida lagu cabbiray heerka kiisaska, ee boqolkiiba togan, iyo cabbir kasta oo kale oo ujeedo ah oo muujinaya gudbinta hadda ama suurtagalka ah ee Oregon.
- Cisbitaal dhigid iyo dhimasho la xiriirta COVID-19.
- Saamaynta caafimaad ee COVID-19 ee kala duwan ee bulshooyinka aan caddaanka ahayn iyo bulshooyinka qabaaailka.

- Hagitaanka ka socda Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka (CDC).
- Tirada dadweynaha ee qayb ahaan ama guud ahaan loo tallaalay.

OHA waa fahamsan tahay saamaynta gaarka ah ee COVID-19 ku yeeshay bulshooyinka aan caddaanka ahayn, bulshooyinka qabiileed, dadka naafooyinka qaba iyo dadka reer Oregon ee waayeelka ah, iyo in caddaalad darrooyinkani ay ka dhasheen cunsuriyad nidaamsan iyo caddaalad darrooyin qaabaysan kuwaasi oo muddo dheer gobolka ka jiray. OHA waxa ka go’an inay sii waddo inay la shaqayso bulshooyinka si ay uga jawaabto walaacyada caafimaadka dadwaynaha sida COVID-19 iyo inay siiso khayraad iyo daryeel kuwa saamaynta ugu badan soo gaartay.

S: Miyaa ganacsiyada iyo goobaha ganacsiga sida goobaha daryeelka caafimaadku ay wali usii baahanayaan xirashada maaskiyada?

Haa. Ganacsiyada iyo ururada waxa laga yaabaa inay fuliyaan siyaasadaha lagu ilaalinayo shaqaalaha, macaamiisha, soo booqdayaasha iyo macaamiilada, oo ay ku jiraan ugu baahnaanshaha maaskarada iyo caddaynta tallaalka, iyada oo la racaayo tilmaamaha Xeerka Naafada Maraykanka iyo Cinwaanka VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah. Ganacsiyo badan iyo shaqa bixiyeyaal ayaa dooran kara inay yeeshaan siyaasadahaan marka la qaado shuruuda maaski xirashada. Ururada iyo meheradaha doorta inay u baahdaan maaskarada iyo/ama caddaynta tallaalka, OHA waxay kula talinaysaa kuwa soo socda:

- Siyaasad cad, qoran oo ay heli karaan shaqaalaha iyo soo booqdayaasha
- Tababarka shaqaalaha ee ku saabsan siyaasada iyo sida loo baro soo booqdayaasha siyaasada
- Calaamado qayaxan, oo muuqda oo ku yaalo meesha laga soo galo iyo xarunta oo dhan
- Maskarooyin dheeraad ah si loo siiyo shaqaalaha iyo soo booqdayaasha aan midna haysan
- Borotokool qayaxan, oo qoran oo looga jawaabay cabashooyinka
- OHA wuxuu ku bixiyay calaamadaha [mareegtan](#) gudaha qeybta “calaamada”.

S: Miyaan xiran karaa maaski haddii bixiyahayga daryeelka caafimaadka uusan u baahnayn inaan sidaa sameeyo?

Haa. Shakhsiyaadka ayaa ku xiran kara maaski gudaha goob caafimaad xataa haddii uusan u baahnayn bixiyuhu.

S: Waxaa liita difaaca jirkeyga waxaana halis badan ugu jiraa cudurka COVID-19 oo daran. Sideen ayaan nafteyda u difaaci karaa markii aan joogo goobo caafimaad haddii dadka igu xeeran aysan xirnayn maaskiyo?

OHA wuxuu kugu boorinayaa inaad la hadasho bixiyahaaga daryeelka caafimaadka. Goobaha caafimaadka qaarkood waxay sii wadi karaan inay dadka ka dalbaan inay xirtaan maaskiyo kadib markii shardiga lagu doonayo arrinkaas ee maamulka gobolka uu waqtigiisu dhammaado. OHA wuxuu sidoo kale ku boorinayaa dhammaan shakhsiyaadka ugu jira halis badan xanuun daran inay ahaadaan kuwo hela xogta had iyo jeer cusub ee ku saabsan tallaalada COVID-19. OHA wuxuu ku boorinayaa shakhsiyaadku inay xirtaan maaski goob kastoo ay joogaan, ayadoo ay kujiraan goobaha caafimaadka haddii ay xanuunsan yihiin, haddii ay halis badan ugu jiraan xanuun daran (ama ay la nool yihiin qof halis sare kujira), ama haddii waqti un kii uu ahaadaba xirashada maaski ay ka dhigto kuwo dareema istareexid intii hore ka badan.

Badqabka iyo Awooda ayaa ku siin kara taageero maskaxeed iyo mid shucuureed inta lagu jiro wakhtigan kala guurka ah. Qiimaynta khatartaada iyo la hadalida bixiyaha daryeelka caafimaadka waxay kaa caawin karaan inaad qaadata go'aano wax ku ool ah oo ku saabsan sida aad naftaada u ilaalin lahayd.
<https://www.safestrongoregon.org>.

S: Haddii aan la noolahay qof waayeel ah ama qof difaaca jirkiisu liito, miyay tahay inaan xirto maaski markii aan ag joogo qofkaasi?

Shakhsiyaadka ka weyn da'da 65 sano jir, shakhsiyaadka qaba xaaladaha qarsoon ee caafimaadka iyo kuwa difaaca jirkoodu liito waxay halis aad ah ugu jiraan xanuun daran oo ah COVID-19. Xirashada maaski si fiican qofka u le'eg waxay yareysaa gudbinta COVID-19. OHA wuxuu ku boorinayaa shakhsiyaadku inay xirtaan maaski goob kastoo ay joogaan, ayadoo ay kujiraan goobaha caafimaadka haddii ay xanuunsan yihiin, haddii ay halis badan ugu jiraan xanuun daran (ama ay la nool yihiin qof halis sare kujira), ama haddii waqti un kii uu ahaadaba xirashada maaski ay ka dhigto kuwo dareema istareexid intii hore ka badan.

Qaadashada tallaabooyinka waxay si gaar ah muhiim ugu yihiin haddii aad ku nooshahay goobo leh isu-gudbid dhexdhexaad ah ama sareysa. OHA wuxuu kula talinayaa shakhsiyaadka inay booqdaan [websaytka OHA ee COVID-19](#) si ay u eegaan xogta iyo macluumaadka cusub ee COVID-19.

S: Miyaa la qaaday ama meesha laga saaray shardiga maaski xirashada ee goobaha caafimaadka ee u diiwaan gashan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon?

Goobaha caafimaadka ee ka diiwaan gashan ODHS waa in ay la tashadaan hayadaas si looga baaraan dago bal in maaskiyada loo baahan yahay wali iyo in kale.

S: Halkee ayaan ka arki karaa amarrada lagu qaaday ama meesha looga saaray waajibinta maaskiga?

Awaamiirta meesha looga saaray shardiga in maaskiga goobaha gudahooda lagu xirnaado, iskoolada gudahooda lagu xirnaado iyo goob caafimaad dhexdeed waxay kujiraan [maaskiyada websaytkooda](#).

S: Ku dhawaaqida OHA ee ah in la joojinayo shardiga xirashada maaski miyay la macno tahay in safmarkii dhammaaday?

Maya, ee safmarku ma dhammaan. Si kastaba ha ahaatee, qeybta xaalada degdega ah ee dadweynaha ayaa soo gabagaboobeysa, waxaana wajahaynaa cudurka COVID-19 oo sidii hore aan u darnayn maadaama dadkeenu helayo difaac ka imaanaya tallaalada iyo u adkeysii ay u yeeshen caabuqa.

OHA waxa ka go'an inay sii waddo inay la shaqayso bulshooyinka si ay uga jawaabto walaacyada caafimaadka dadwaynaha sida COVID-19 iyo inay siiso khayraad iyo daryeel kuwa saamaynta ugu badan soo gaartay. [Badqabka iyo Awooda](#) ayaa ku siin kara agabyo badan oo loogu tala galay adiga iyo bulshadaada wakhtigan kala gurka ah.

S: Ururkaygu wuxuu sii wadaa inuu waajibiyo maaskarada. Maxaan samayn karaa haddii cid timaaddo ururkayga oo ay diiddo xirashada maaskarada?

Loo-shaqeeyayaasha iyo ganacsiyadu waxa waajib ah inay raacaan tilmaamaha Xeerka Ameerikaanka Naafada qaba iyo Title VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga. Haddii qof nafo ah uusan xiran karin maaskaro, meeshii qofka looga baahan yahay, goob lagu soo dhaweeyo dadweynaha, sida meel ganacsi ama meel u furan dadweynaha, waxaa loo baahan doonaa in lala shaqeeyo qofkaas si loo siiyo qaabilaad macquul ah. Qaar ka tirsan qaabilaadaha guud ee macquulka ah waa:

- baabuurkiisa oo qofka si bilaash loogu geeyo wuxuu rabo
- qofka si bilaash ah guriga loogu geeyo wuxuu rabo
- ballan taleefan ama maqal iyo muuqaal

Loo-shaqeeyaha waajib kuma aha inuu u oggolaado macmiil ama booqde inuu gudaha soo galo isagoon xirnayn maaskaro hadduu waajib yahay.

OHA kuma taliso in loo-shaqeeyayaasha iyo ganacsiyadu ay waydiiyaan shakhsiyaadka naafada ah inay keenaan caddayn naafonimadooda ah. Haddii qofku sheego inuu nafo yahay oo markaasi aanu xiran karin maaskaro, loo-shaqeeyaha ama ganacsigu waa inuu tixgaliyo qaabilaadda macquulka ah ee ay u samayn karaan si ay ugu saamaxaan qofku inuu helo adeegyada.

Haddii qofku aanu haysan maaskaro, loo-shaqeeyaha ama ganacsiga ayaa qofka siin kara maaskaro uu isticmaalo intuu iyaga la joogo. Haddii qofku aanu nafo qabin oo uu diido inuu xirto maaskaro halka ay waajib tahay, loo-shaqeeyuhu ama ganacsigu wuu u diidi karaa qofkaasi adeegga.

S: Ma la ii oggol yahay inaan xirto maaski dhismayaasha goobaha dadwaynaha gudahooda?

Haa. Qof kasta oo raba inuu sii wato xirashada maaskarada wuu samayn karaa, oo ay ku jiraan gudaha goobaha dadweynaha iyo gudaha goobaha shaqada. Intaas waxaa dheer, hay'adaha iyo ganacsiyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay uga baahdaan shaqsiyaadka inay xirtaan maaskarooyin.

S: Waxaan rabaa inaan sii wado xirashada maaskarada ee goobaha dadwaynaha in kastoo waajibintii la qaaday. Waa kee maaskarada ugu fiican ee aan xiran karo?

Maaskarada ugu fiican waa kan ugu difaaca badan ee aad si sax ah oo joogto ah u xiran karto. Maaskaro si fiican kuugu habboon oo ku wanaagsan wajigaaga waxay hubineysaa in aysan jirin dalool u oggolaanaya dhibcaha neefsashada inay galaan ama ka baxaan maaskarada. Intaa waxaa dheer, maaskaro leh wax ka badan hal lakab ayaa ka fiican marka loo eego maaskaro hal-lakab ah. In kasta oo dhammaan maskarooyinka iyo neef-qaadayaasha ay bixiyaan xoogaa heer difaac ah, neef-qaadaha si sax ah kuugu habboon, sida maaskaro N95 iyo KN95, ayaa bixiya difaaca heerka ugu sarreeya. Noocyadan neef-qaadayaasha heerka sare ah ayaa laga yaabaa inay kaliya lagama maarmaan u noqdaan, si kastaba ha noqotee, goobaha khatarta sare leh ama dadka khatarta ugu jira inay qaadaan COVID-19 daran. CDC waxay ku leedahay macluumaad dheeraad ah halkan:

<https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/prevent-getting-sick/about-face-coverings.html>.

S: Waa maxay waxa aan samayn karo haddii qof igu dhibo inaan sii wado xirashada maaskarada?

OHA waxay taageertaa dhammaan shakhsiyaadka doorta inay xirtaan waji daboolaha. Shakhsiyaadka waa inay ixtiraamaan doorashada dadka kale oo ah inay xirtaan maaskaro. Waxaa jira sababo kala duwan oo ku saabsan sababta qofka uu u xiran karo waji daboole. Sababaha qaarkood waxaa ka mid ah in qofka laga yaabo inuu qabo naafanimo ama xaalad caafimaad taas oo khatar sare u horseedeyso oo ku aadan xanuun daran oo COVID-19 ah.

Dadka midabka leh waxaa laga yaabaa inay la kulmaan dhibaateyn, eexasho, dhinac u saarid ama ficil-celino ama saameyno kale oo xun marka ay xiran yihiin maaskarada ama waji daboolaha. Tani waxaa laga yaabaa inay sababteedu tahay eexasho cunsurinimo ah, hafiraad, ama takoor. Sharciga Oregon ma oggola takoor, ama nacayb ama dembiyo eexasho ah. Dambiga nacaybka ama eexashada ku saleysan waa fal-dambiyeed, oo ay ku jirto taabasho jireed, weerar, burbur hanti ama hanjabaad, oo laga yaabo inay ku salaysan tahay qof kale wax uu ka aaminsan yahay:

- Isirka,
- Midabka,
- Naafonimada,

- Diinta,
- Asal-qarameedka,
- Nooca galmada, ama
- Aqoonsiga jinsiga.

Dhacdooyinka eexashada waa u muujin kasta oo cadaawadeed oo loo muujiyo qof kale, oo ay ka mid yihiin hadal-nacayb ah, ku jeesjeesid, canjilaad, dhinac u saarid, ama u diidida adeegga ee takoorka ku saleysan, ee la xiriira inuu qofka kale u arko qofka inuu yahay koox la ilaaliyo (kor lagu xusay).

Qofka aaminsan inuu la kulmay nacayb ama eexasho dembiamadhacdo sababtuna tahay ku xirashada maaskarada, waji daboolka ama gaashaanka wajiga ama ku xirasho la'aanta maaskarada, waji daboolka ama gaashaanka wajiga goob dadweyne waxay heli karaan qoraallo caawiya. Si aad u soo sheegto dambi eexasho ah, ka wac fulinta sharciga 911. Si aad u soo sheegto dhacdo eexasho ah, ka wac Waaxda Caddaalada ee Oregon lambarka 1-844-924-BIAS (2427). Garaac 711 wixii Adeeg Gaarsiin Oregon ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo StandAgainstHate.Oregon.gov. Si aad u gudbiso cabasho xuquuqda maddaniga ah ku saabsan, booqo Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha (BOLI) websaydkiiska ama ka wac 971-673-0764.

S: Waa maxay talooyinka OHA ay hayso si ay uga caawiso la hawlgaleyaasha inay gaarsiiyaan bulshooyinkooda go'aanka OHA ee qaadista waajibinta xirashada maaskiga?

Dadka reer Oregon waxa dhici karta inay daneeyaan inay la xiriiraan dadka go'aanada sameeyaa ee kujira bulshooyinkooda. Go'aan-sameeyayaasha Oregon ku sugan qaarkood waa:

- Gubanatoraha
- Sanatarka Gobolka
- Wakiilka Gobolka
- Golaha Caasimada
- Guddoomiyaha Degmada
- Xubin Katirsan Guddiga Iskoolka

Si aad ulaxiriirto Xafiiska Gobanatoraha Oregon, booqo <https://www.oregon.gov/gov/pages/contact.aspx>.

Si aad ula xiriirto xildhibaanada, reer Oregon waxay ka heli karaan wakiiladooda iyo sanatarka websaytkaan.

Qaab kale oo loo helo go'aan-qaatayaashu waa inaad ka baarto internetka ah si aad u hesho golaha deegaanka ama xubnaha guddida dugsiga ama guddoomiyayaasha degmooyinka.

S: Hay'ada ka dhex shaqeysa gudaha bulshadeyda waxay bixisaa adeegyo ay dadka qaarkood u baahan yihiin. Miyaan wali u baahan karaa maaskiyo loogu tala galay shakhsiyaadka dhammaantood?

Iyadoo aad awoodo inaad uga baahato shaqaalaha inay xirtaan maaski iyo inaad uga baahato xirashada maaski dadka u imaanaya xaruntaada adeegyo, haddii aad aado bulshada si aad u siiso adeegyo, waxaa laga yaabaa inaad awoodin inaad uga baahato dadka aad u adeegeyso inay xirtaan maaski, illaa haddii aad iyaga la leedahay heshiis adeeg oo sheegaya inay ku qasban yihiin inay xirtaan maaski markey helayaan adeegyada.

S: Miyey waalidiintu ikhtiyaar u leeyihiin in carruurtoodu ku xirtaan maaskaro dugsiga in kastoo OHA ayna waajibinayn in dugsiyada maaskaro lagu xirto?

Haa. Ardayda iyo shaqaaluhu wali ikhtiyaar ayey u leeyihiin inay sii wadaan xirashada maaskarada inta ay joogaan xarumahan. Degmo dugsiiyeedyada qaar waxay sii wadi karaan inay ku waajibiyaan xirashada maaskarada ardayda iyo shaqaalaha ku sugan dugsiyada K-12. Waalidiintu waa inay hubiyaan degmo dugsiiyeedkooda si ay u ogaadaan bal haddii maaskaradu waajib ka tahay dugsiyadooda.

S: Haddii degmadaydu leeyahay waajibinta maaski ee dugsiyada ama dhismayaasha gudahaoga, laakiin gobolku aanu lahayn, ma inaan raaca waajibinta degmada?

Haa. Shakhsiyaadka waxa waajib ku ah inay raacaan siyaasadaha deegaanka ee ku waajibinaya xirashada maaskarada. Siyaasadahan waxa fulin kara maamulada magaalada iyo kuwa degmada, guddiyada dugsiyada iyo maamulada kale ee go'aan-qaadasho ee deegaanka.

S: Waa maxay caqabadaha dadka naafada ahi ay la kulmi karaan marka dadka kale ay xirtaan maaskarooyin, gaashaanka wajiga ama waji daboolada?

Caqabadaha dadka naafada ahi ay la kulmi karaan waa:

- Dadka qaar waxay u baahan yihiin inay arkaan dhaqdhaqaaqa afka ama wajiga si ay u fahmaan waxa aad sheegeyso.
- Dadka qaar ee naafada korriinka ama kala duwanaanshaha qaba ayaa si xun u fahmi kara ama si khaldan u fasiran kara baaqyada wajiga. Qofka ayaa laga yaabaa inuu ku dhibtoto ka fahamka shucuurta ee dhawaaqa codka keligiis. Haddii aad xiran tahay maaskaro, waxay ka heli karaan tilmaamo indhahaaga ama baalasha-indhahaaga, taasoo horseedi karta fasiraad khaldan ama si khaldan u fahmida shucuurta/dareenka ama ujeedada hadalka.

- Dadka dhegaha culus qaarkood ayaa akhriya bishimaha. Dhaqdhaqyada afka iyo baaqyada wajiga ayaa gudbin kara macluumaad badan oo maaskarooyinka aan wax laga arkaynin waxay dadka ka horjoogsadaan inay arkaan afka qofka hadlaya.
- Faro-ku-hadalka waxaa loo adeegsadaa afka si uu u gudbiyo ereyada qaarkood iyo macnaha. Markuu waji daboolaha xannibo/qariyo qofka afkiisa, waxaa ku adkaanaya dadka isticmaala faro-ku-hadalka inay wada-hadlaan.

Looshaqeeyayaasha iyo goobaha soo dhaweeya dadweynaha waa inay la shaqeeyaan dadka naafada ah si ay ugu qabanqaabiyaan texgelin macquul ah oo u oggolaanaya shaqaale inuu qabto shaqadiisa ama u oggolaanaya horjooge inuu helo adeegyada. Dadka loo diiday qabatim macquul ah waa inay kala xiriiran Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha (BOLI) [Qeybta Xuquuqda Madaniga](#) lambarka 971-673-0764 ama crdemail@boli.state.or.us.

S: Maadaama maaskiyo aanay waajib ahayn gudaha dhismayaasha wixii intaan kadambeeya, ma jiraan qaabab kale oo aan u ilaalin karo shaqaalahayga iyo xubnaha dadwaynaha markay goobteyda ganacsigayga ku sugan yihiin?

Waxa jira qaabab kale oo ganacsiyada iyo ururradu ay u sii wadan karaan ilaalinta shaqaalaha iyo xubnaha dadwaynaha:

- Kadalab inay iska tallaalaan COVID-19 shaqaalaha haddii sharcigu ogol yahay.
 - Tallaalka ka dhanka ah COVID-19 wali waa qaabka ugu waxtarka badan ee kahortagga xanuun halis badan iyo isbitaal dhigid uu keeno caabuga COVID-19.
- Ku waajibi caddayn tallaal booqdayaasha iyo macaamiisha inay sitaan, gaar ahaan gudaha dhismayaasha.
- Sii wad inaad ku waajibiso xirashada maaskaro shaqaalaha iyo xubnaha dadwaynaha si ay u soo galaan dhismaha.
- Kordhi hawada soo galaysa gudaha dhismayaasha, sida inaad furto daaqadaha halkii ay suurtoagal tahay ilaa iyo inta samaynta sidaasi ayna khatar ku keenayn shaqaalaha ama booqdayaasha.
 - OHA waxay ku talinaysaa dib u eegida [Talooyinka Caafimaadka Dadwaynaha ee COVID-19: Ku xisaabtanka hawada gudaha dhismayaasha ee meelaha yaryar](#) si aad u hesho macluumaad ku saabsan hagaajinta tayada hawada gudaha dhismaha.
- Halkii ay suurtoagal tahay, ikhtiyaar u sii shaqaalaha iyo macaamiisha inay yara baxaan. Tan waxa ku jiri kara inaad diyaariso meel bannaanka ah oo la fariisan karo iyo inaad u wareejiso kulamada bannaanka, ilaa iyo inta ayna khatar ku keenayn shaqaalaha ama booqdayaasha.

- Kordhi masaafadda u dhaxaysa dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha iyo booqdayaasha.

Helida dukumintiga: Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad qoraal waaweyn ku qoran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriiir Kahortagga Cudurrada Degdegga ah iyo Kuwa Faafa 971-673-1111 ama iimeylka OHD.ACDP@dhsosha.state.or.us. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada gudbinta ah, ama waxaad wici kartaa 711.